Faallo Kooban 07

Tubta Doorashooyinka Soomaaliya ee 2021: Fursadaha & Caqabadaha

Abriil 2020

Soo koobid

Sanadkan waxa uu muhiim u yahay doorashada Soomaaliya maadaama doorashada baarlamaanka iyo tan madaxweynaha la qorsheeyay inay dhacaan dhammaadka 2020 iyo horraanta 2021. Sharciga doorashooyinka qaran – oo ay dhawaan ansixiyeen labada gole ee baarlamaanka madaxweynahana saxiixay – ayaa hadda aasaas u ah hirgelinta doorashooyinka qaran. Faalladan waxay si kooban u falanqayneysaa iimaha sharciga doorashooyinka sida in aanu qeexeyn deegaan doorashooyinka, mugdiga ku jira doorashada Aqalka Sare, iyo qodobka suuragelinaya in muddo kordhin aan xaddidneyn la sameeyo. Qoraalku waxa uu sidoo kale ka hadlayaa caqabadaha ku hor gudban doorashooyinka, sida u qoondeynta kursi kasta goob cayiman; doorashada wakiilada Soomaaliland; qoondada haweenka; khilaafka u dhexeeya dowladda dhexe iyo maamul goboleedyada; iyo nabadgelyo la'aanta. Waxay warbixinta soo jeedineysaa dhowr talooyin si wax looga qabto arrimahaas.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2020 Somali Public Agenda

Hordhac

2020 iyo 2021 sanado doorasho ayay u yihiin Soomaaliya. Muddo xileedka xubnaha labada gole ee baarlamaanka (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare) wuxuu ku egyahay dhammaadka bisha Diseembar 2020; waxaa la caleemasaaray 27-kii Diseembar 2016. Muddo xileedka Madaxweynaha wuxuu sidoo kale dhammaanayaa horraanta Febraayo 2021.

Inkastoo Soomaaliya ay ku jirto xaalad nugul iyo kasoo kabsasho colaadeed, tilmaan gaar ah oo siyaasada Soomaliya dhowaanahaan ku astaysneyd ayaa ah in si nabad ah hoggaanka siyaasadeed lagula kala wareego. Tan iyo 2012, xulashooyin iyo doorashooyin dadban ayaa hoggaanka lagula kala wareegayay. Sannadkii 2012, 135 oday dhaqameed ayaa soo xulay 275 xildhibaan. Sanadkii 2016, doorasho dadban ayaa la isku raacay. Min 51 cod-bixiyeyaal ah oo ay odayaasha dhaqanka kasoo xuleen beelaha ayaa doortay 275 xildhibaan kuwaasoo iyaga iyo 54 xubnood oo aqalka sare ah ay doorteen madaxweynaha. Si kastaba ha noqotee, nidaamyadan waxay fududeeyeen soo xulista baarlamaanka iyo wareejinta awoodda si nabadgelyo ah.

Wixii ka danbeeyay 2016-17 hiigsiga wuxuu ahaa in la qabto doorashooyin baarlmaan oo qof iyo cod ah dhammaadka 2020. Waxaa loo igmaday dowladda talada heysa in ay ka dhabeyso qabsoomidda doorashadaas. Waxaa la sameeyay dadaallo lagu suuragalinayo arinkaas, oo ay ka mid yihiin diiwaangelinta kumeelgaarka ah ee xisbiyada siyaasadeed, qiimeynta goobaha doorashada, dib-u-eegis ay sharciga xisbiyada siyaasadeed ku sameeyeen Golaha Wasiirrada iyo diyaarinta iyo ansixinta sharciga doorashooyinka.

Sharciga doorashooyinka waxa ku jira faafaahinta ugu muhiimsan ee doorashooyinka la filayo in ay qabsoomaan. Markii ay hannaanka doorasho ee Metelaadda Isku-dheellitiran ee Liiska Xiran ku heshiiyeen hoggaanka Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada bishii Juun 2018 magaalada Baydhabo, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ayaa qortay sharciga una gudbisay Golaha Wasiirrada. Golaha Wasiirradu waxay meel mariyeen Hindise Sharciyeedka Doorashooyinka horraantii bishii May 2019, waxana ay u gudbiyeen Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si uu u ansixiyo (Wasuge & Moman, 2019). Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa magacaabay guddi ka kooban 15 xubnood si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan sharciga. Wadatashiyo kadib, guddigu waxay meesha ka saareen doorasho ku saleysan Matalaada Isku-dheellitiran ee Liiska Xiran waxaana ay soo jeediyeen nooca Horeeya Guuleysta. Kadib asbuucyo baarlamaanku ka doodayay sharciga doorashooyinka, Goluhu wuxuu ansaxiyay 28-ka Diseembar 2019. Tan waxaa ku xigay ansixinta Aqalka Sare 8-dii Febraayo 2020, ugu dambeyntiina madaxweynaha ayaa saxiixay sharciga 20-kii Febraayo ee sannadkan. Beesha caalamka ayaa ku cadaadisay labada gole ee baarlamaanka in ay dedejiyaan dib-u-eegista iyo ansixinta sharciga doorashooyinka.

Si ka duwan hababkii hore ee doorashooyinka Soomaaliya, sharciga doorashooyinka, oo ka kooban 7 cutub iyo 58 qodob, ayaa hadda ah dukumiintiga hagaya doorashooyinka qaran ee Soomaaliya.

Iimaha sharciga doorashooyinka

Inkastoo la ansxiyay lana faafiyay sharciga doorashooyinka qaranka, haddana xeerku wuxuu leeyahay dhowr iimood. Arrimaha muhiimka ah ee ku jira sharciga doorashada una baahan feejignaan waxaa kamid ah: (i) nooca doorashada ee Horreeyaa Guuleysta (ii) doorashada xubnaha Aqalka Sare iyo metelaadda gobolka Benaadir ee Aqalka Sare, (iii) caqabadaha diiwaangelinta codbixiyeyaasha, iyo (iv) suurtagalnimada mudo kororsi.

1. Habka Doorashada

Qodobka 10-aad ee sharciga doorashooyinka qaranka ayaa sheegaya in nooca doorashada uu noqon doono "Nidaamka Aqlabiyadda" oo ku saleysan Horreeyaa Guuleysta. Qodobkan ayaa sidoo kale shardi ka dhigaya in xisbi siyaasadeed kasta uu musharaxiin ku lahaado ugu yaraan 50% kuraasta labada aqal ee baarlamaanka.

Qaabka loo soo jeediyay oo ah Horreeyaa Guuleysta wuxuu ka dhigan yahay in laga guuray nidaamkii Metalaada Isku-dheellitiran ee Liiska Xeran oo ay horay u ansixiyeen Golaha Wasiirrada. Markii uu guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya magacaabay 15 xubnood oo guddi-hoosaad ah oo dib-u-eegis ku sameeya sharciga, guddigu wuxuu beddelay nidaamkii doorashada. Marka laga soo tago xaqiiqada ah in qaar kamid ah maamul goboleedyadu ay kasoo horjeedeen in hal deegaan doorasho noqoto doorashada ayna beddelkeeda doorbidayeen deegaan doorasho ku saleysan heer dowlad goboleed, siyaasiyiinta qaar ayaa taageersanaa nooca Metalaada Isku-dheellitiran ee

Liiska Xiran waxaana ay aaminsanayeen inay ku habboon tahay dalalka nugul ee kasoo kabanaya colaadaha sida Soomaaliya oo kale.

Nooca Horreeyaa Guuleysta wuxuu leeyahay dhowr cilladood. Midda koowaad, in kastoo aan si cad loogu qeexin labada faqradood ee qodobka 10-aad (oo sharraxaya qaabka doorashada), nooca doorasho ee Horeeyaa Guuleysta ayaa sharciyeynaya hannaanka awood-qeybsiga beelaha ee 4.5 oo muddo dheer laga isticmaaliyay Soomaaliya, laakiin ilaa hadda aanan lagu qorin sharci dawladeed. Qodobka 12 (3) ee xeerka doorashada qaran wuxuu si cad u sheegayaa in 275-ta kursi ee Golaha Shacabka ay ku salaysnaan doonaan awood-qeybsiga beelaha. Inkastoo kuraasta loo qoondeeyey beel ahaan, kursi kasta wuxuu lahaan doonaa meel loo cayimay, sidoo kale dadka u qalma in ay cod bixiyaan ee ku sagan goobaha codbixinta waxay codkooda siin karaan musharixiinta tartamaya.

Midda labaad, si ka duwan nooca metelaadda isku-dheellitiran, Horeeyaa Guuleysta wuxuu horseedayaa doorashooyin toos ah oo ay cod-bixiyeyaasha u codeyn karaan musharraxiinta ay rabaan. Laakiin maadaama kuraasta loo qoondeeyay beelo, uma furna muwaadin kasta inuu u tartamo kursiga (Wasuge & Isak, 2020). Si kale haddii loo dhigo, qof kasta oo cod-bixiye ah oo ku sugan deegaan doorasho gaar ah wuxuu awoodi doonaa inuu codeeyo, laakiin wuxuu u codeyn karaa oo keliya musharraxiinta kasoo jeeda beelaha kursiga loo asteeyay. Inkastoo musharrax u qalma kursi uu deggenaan karo magaalada Muqdisho, tusaale ahaan, kursiga beeshiisa/beesheeda waxaa loo asteyn karaa degmada Hobyo. Tani waxay la macno tahay in qofkaasi xaq u leeyahay oo keliya inuu u tartamo kursiga la geeyay Hobyo. Haddii degmo kasta loo qoondeeyo beel gaar ah, markaa tani waxay dhalineysaa su'aal ah in cod-bixiyeyaasha ku sugan deegaan doorashadaas oo aan kasoo jeedin beeshaas ay ka qeyb qaadan doonaan doorashada oo ay codkooda dhiiban doonaan.

Midda saddexaad, qodobka 10-aad ee sharciga doorashooyinka wuxuu shardinayaa in uu xisbi siyaasadeed kasta ku lahaado musharraxiin ugu yaraan 50% (ama 165 musharrax) kuraasta baarlamaanka. Inkastoo ay tani shuruud muhiim ah u tahay in la helo siyaasad ku dhisan hannaanka xisbiyada badan, xisbiyada siyaasadeed ee Soomaaliya uma muuqdaan kuwo diyaar u ah inay ka qeyb galaan doorashooyinka qaran. Sababtuna waa in ilaa iyo hadda aanu jirin muwaadin loo diiwaangeliyey codbixin, iyo in shuruudaha diiwaangelinta rasmiga ah ee xisbiyada ay adag tahay in la buuxiyo. Hadda, Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka wuxuu si kumeelgaar ah u diiwaangeliyay 76 xisbi siyaasadeed. Hindise-sharciyeedka xisbiyada siyaasadeed ee dib-loo-eegay wuxuu weli gacanta ugu jiraa Golaha Shacabka si loo ansaxiyo. Sikastaba ha noqotee, qodobka 6-aad ee sharciga xisbiyada siyaasadeed wuxuu dhigayaa xisbi si uu u noqdo mid rasmi ah waa inuu lahaado xafiisyo iyo ugu yaraan 10,000 xubnood oo cod-bixiyeyaal ah oo u diiwaangashan kuwaasoo kala jooga 9 kamid ah gobollada Soomaaliya kahor 1991 (Isak & Wasuge, 2019). Ma jiro xisbi weli fuliyay shuruudahan. Mana jiro cod-bixiye diiwaangashan, taasoo ka dhigaysa shuruudan xilligan mid adag in la fuliyo. Tani waxay carqalad gelineysaa kaalinta xisbiyada siyaasadeed ee doorashooyinka soo socda. Xisbiyada hadda ku-meelgaarka ah ee diiwaangashan miyaa ku tartami doona doorashada soo socota iyagoo aan si rasmi ah loo diiwaangelinin?

Qodobka 12 (9) wuxuu sidoo kale qorayaa in 4% (13 xildhibaan ee labada aqal) in ay yihiin tirada ugu yar ee xisbiyada siyaasadeed loogu aqoonsan karo xisbi metalaad ku leh baarlamaanka. Haddii xisbiyadu aanan si rasmi ah loo diwaangelin wakhtiga doorashada kahor, shardiga 4% wuxuu beddeli karaa diiwaangelinta joogtada ah, taasoo la micno ah in xisbiyada ku guuleysta ugu yaraan 13 kursi ee labada aqal loo aqoonsan karo inay yihiin xisbiyo qaran oo rasmi ah.

2. Doorashada Aqalka Sare iyo metelaadda Benaadir

Qodobka 12-aad ee sharciga doorashooyinka waxa uu sharraxayaa doorashada labada aqal ee baarlamaanka. Halka doorashada xubnaha 275-ta ah ee Golaha Shacabka ay caddahay kuna saleysan tahay shaxda awood qaybsiga 4.5, nidaamka doorashada ee 54-ta xubnood ee Aqalka Sare mugdi ayaa ku jiro. Qodobka 12 (4) waxa uu sheegayaa in Aqalka Sare uu ka koobnaan doono 54 xubnood ayna si toos ah usoo dooraanayaan muwaadiniinta ku nool maamul goboleedyada. Qodobka 12 (7) waxa uu qeexayaa in doorashada labada gole ee baarlamaanka ay isku mar qabsoomi doonto muwaadiniintana ay isku mar u wada codeyn doonaan musharraxiinta labada gole.

Sharciga doorashooyinka ma qeexayo sida 54-ta kursi ee Aqalka Sare hal mar loogasoo wada dooranayo guud ahaan maamul goboleedyada. Sharcigu wuxuu weliba xusayaa in xubnaha aqalka sare ku metelayo Soomaaliland iyo nidaamkooda doorasho ay goo'aamin doonaan baarlamaanka. Tani waxey la micno tahay in nidaam xulasho gaarka ah loo sameyn doono kuraasta Aqalka Sare ee deegaanada Soomaaliland.

Waxaa sidoo kale xusid mudan in Gobolka Benaadir aanu metelaad ku lahan Aqalka Sare waayo maqaamka caasimadda weli lama jaangoyn. 54-ta xubnood ee Aqalka Sare waxey kala metelaan Soomaaliland (11), Puntland (11), Jubaland (8), Koonfur Galbeed (8), Galmudug (8), iyo Hirshabeelle (8). Qodobka 12 (6) ee sharciga doorashooyinka qaran wuxuu soo jeedinayaa in labada gole ee baarlamaanka ay dejiyaan sharci qeexayo metelaadda Benadir ee Aqalka Sare isaga oo aan soo jeedin jadwalka dejinta xeerkan. Dastuurka kumeelgaarka ah, oo weli ku jiro dib-u-eegid, waxa uu sheegayaa in kuraasta loo qoondeyo qaab ku saleysan 18-ka gobol ee Soomaaliya iyo in la hubiyo sinnaanta tiro ahaan ee heerka Dowladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka (The Federal Republic of Somalia, 2012).

3. Caqabadaha diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha

Sharciga doorashooyinka, gaar ahaan qodobka 16 (4), waxa uu soo jeedinayaa nidaam diiwangelin ee cod-bixiyeyaasha oo biometric ah. Diiwaan-gelinta biometric-ga ah muwaadinka ugama baahna dukumiinti ama akhris-qoris. Wuxuu sidoo kale ka turjumayaa caqabadaha jira sida tirakoob la'aanta, maqnaanshaha nidaam aqoonsi qaran, iyo heerka sare ee wax qoris la'aanta ka dhex jirta shacabka (Wasuge & Moman, 2019).

Waxaa jira caqabado dhowr ah oo ay tahay in laga gudbo si loogu guuleysto diiwaangelinta codbixiyeyaasha. Tan koowaad, diiwaangelinta codbixiyeyaasha waxay u baahan tahay xasilooni siyaasadeed. Si loo diiwaan-geliyo cod-bixiyeyaasha u qalma ee dalka oo dhan, maamullada waa inay aqbalaan ayna soo dhaweeyaan hawsha diiwaan-gelinta. Guddiga Madaxa-banaan ee Doorashooyinka Qaaranka (GMDQ) waxay sheegeen inay soo indhadheeyeen xarumaha diiwaangelinta codbixiyeyaasha ee gobolka Benaadir iyo saddexda dowlad goboleed marka laga reebo Puntland iyo Jubaland. Iyadoo uu taagan yahay xiriirka cakiran ee ka dhexeeya Puntland iyo Jubaland oo dhinac ah, iyo dowladda federaalka oo dhinaca kale ah, diiwaangelinta codbixiyeyaasha waxey wajaheysaa caqabado siyaasadeed oo culus.

Tan labaad, diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha biometric-ga waa qaali. GMDQ ayaa sheegay bishii Agoosto ee sanadkii hore in diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha biometric-ga ee doorashooyinka 2020/21 ay u baahan tahay miisaaniyad dhan $21 malyan. Marka la eego miisaaniyadda dowladda federaalka ee doorashooyinka oo xaddidan, dawladda waxay ku tiirsanaan doontaa beesha caalamka – oo laga yaabo in aysan diyaar u aheyn inay bixiyaan – si ay u daboosho kharashaadka diiwaangelinta codbixiyeyaasha. Tan seddexaad, nabadgelyo-xumada ka jirta Soomaaliya ayaa xaddideysa diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha. Nuglaanta amniga ee qeybo badan oo koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya kamid ah waxay la macno tahay in GMDQ ay diiwaangelinta codbixiyeyaasha ka sameyn doonaan keliya magaalooyinka waaweyn.

Waxa kale oo jira caqabado kale oo ay ka mid yihiin awoodda farsamo ee GMDQ ee ku aadan diiwaangelinta codbixiyeyaasha hab biometric ah muddo gaaban gudaheeda. Waxa kale oo jira faham yar iyo aqoonta madaniga ah ee inta ugu badan shacabka da'da yar ee Soomaaliyeed oo ku saabsan diiwaangelinta codbixiyeyaasha iyo doorashooyinka. GMDQ waxa uu bilaabay olole wacyigelinta cod-bixiyeyaasha iyo aqoon isweydaarsiyo. Arrimahan oo dhan waxay tilmaamayaan in shuruudaha diiwaangelinta biometric-ga ah ee cod-bixiyaha oo buuxa ay sababi doonto dib-u-dhac farsamo ee doorashooyinka.

4. Suurtagalnimada muddo kordhin

Muddo ka yar 10 bilood ayaa ka hadhsan muddo xileedka baarlamaanka hadda jira. Qodobka 53-aad ee sharciga doorashooyinka qaranku wuxuu qeexayaa duruufaha dib-u-dhigi kara doorashooyinka wixii ka dambeeya 26-ka Diseembar 2020. Qodobku wuxuu leeyahay waa in GMDQ uu u keenaa labada gole ee baarlamaanka jadwalka iyo macluumaadka lagama maarmaanka u ah

doorashada wakhtiga lagu cayimay qodobka 13 (3). Qodobkan 13 (3) waxa uu leeyahay GMDQ waa in uu ku dhawaaqo wakhtiga doorashada 6 bilood (180 maalmood) kahor maalinta doorashada. Qodobka 53-aad wuxuu kaloo dhigayaa in haddii GMDQ uu ku qaban kari waayo doorashada wakhtigeeda ama uu ku dhawaaqo inuusan qaban karin doorashada, baarlamaanka ayaa kalfadhi wadajir ah go'aan kaga gaari doona. Waxaa sidoo kale muhiim ah, haddii doorashada dib loo dhigayo, xitaa cillado farsamo awgood, qodobkan sooma jeedinayo wakhtiga muddo kordhinta.

Qodobka 53-aad ee sharciga doorashooyinka qaranka wuxuu muujinayaa mugdiyo. Ugu horayn, haddii arrimaha kale ay caadi yihiin, waxay u muuqataa in dib-u-dhac farsamo ay tahay lama huraan. Sharciga ayaa u siinaya baarlamaanka awood buuxda oo ay go'aan kaga gaaraan mustaqbalkooda. Waxay wakhtigooda ku kordhin karaan bilo iyo/ama sanado aan xadidneyn. Isku-day kasta oo baarlamaanku ku kordhiyo wakhtigiisa wuxuu Soomaaliya u abuuri karaa dhibaatooyin. Midda labaad, haddii howsha doorashada ay dib u dhacdo ama aan la bilaabin kahor inta muddada madaxweynaha aysan dhammaan, taasi waxay khalkhal gelin kartaa dadaallada dowlad-dhiska waxayna abuuri kartaa qalalaase siyaasadeed. Saddex, muddo kordhin kasta waxa ay carqalad ku noqonaysa marxaladda kala guurka siyaasadeed ee Soomaaliya, hoggaanka talada hayana waxaa soo wajahi kara cillad sharciyeed.

Caqabadaha fulinta

Si ka duwan doorashadii dadbaneyd ee 2016 – o ay xubnihii Madasha Hoggaamiyeyaasha Qaran ka doodeen iskuna raaceen qaabka doorashada – Sharciga Doorashooyinka Qaranka ayaa hagaya doorashooyinka qaranka ee soo socda. Hase yeeshee, waxaa jira arrimo badan oo aan lagu caddeynin sharciga doorashooyinka laakiin muhiim u ah fulinta sharciga. Arrimahan kuwa ugu waaweyn ee aan lagu caddeyn sharciga waxaa kamid ah; qeexidda deegaan doorashooyinka, metalaadda haweenka iyo doorashada kuraasta ee wakiillada Soomaaliland.

Mid kamid ah qodobbada ugu muhiimsan ee hirgelinta sharciga doorashooyinka ayaa ah qaabeynta deegaannada lagu dooranayo kursi kasta. Ugu horeyn, 275-ta xubin ee Golaha Shacabka waxaa loo qoondeeyey beelo ayadoo loo maray nidaamka 4.5. Tani ayaa micnaheedu yahay in kuraasta qabiil walba ay tahay in la geeyo hal ama labo degmo oo ay beeshaasi ku badan tahay. Waa ay adag tahay maadaama beelaha qaar ay degaan degmooyin badan iyagoo u deggan jufo hoosaadyo. Haddii kursi loo cayimo magaalo gaar ah, waxay ka dhigan tahay in hal jufo ay heli doonto faa'ido badan marka la barbar dhigo jufooyinka kale ee u tartamaya isla kursigaas. Midda labaad, in magaalo loo cayimo kursi waxay u baahan tahay wadatashi ay wada yeeshaan Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka, dowlad goboleedyada, iyo beesha kursiga iska leh kuna heshiinayaan goobta la dhigaayo ama loogu tartamaayo kursiga. Tani ayaa waxa ay u badan tahay in ay abuurto khilaaf ka dhex dhaca daneeyaasha doorashada taasoo dib u dhigi karta hannaanka doorashada.

Caqabad kale ayaa ah qaabeynta degmooyinka lagu dooranayo xubnaha baarlamaanka ee metalaya Soomaaliland. Soomaaliland ayaa iskeed ugu dhawaaqdey in ay ka madax bannaan tahay Soomaaliya, xukuumaddeedana waxaa ay mar walba diidaa in ay ka qeyb qaadato doorashooyinka heer federal ee Soomaaliya. Iyadoo ay jirto xaaladdan siyaasadeed, xildhibaannada rabo in ay Soomaaliland ku metalaan baarlamaanka Soomaaliya ayaa u baahnaan doona hannaan gaar ah. Tusaale ahaan, haddii xildhibaannadan la isla garto in lagu doorto Muqdisho, waxaa ay ka dhigan tahay in dadka degmooyinka gobolka Benaadir deggan ay u codeeyn doonaan. Su'aasha ayaa noqoneysa, xagee ayey noqoneyaa deegaan doorashadooda? Yeyna metelayaan: ma kuwa soo doortey mise beelaha ay ka dhasheen oo deggan Soomaaliland? Haddii jawaabtu ay noqoto midda hore, sidee ayey tani u waafaqeysaa doorashooyinka ku saleysan 4.5? Haddii midda dambe ay tahay, maxaa ku dhiirrigelinaaya cod-bixiyeyaasha Benaadir jooga in ay u codeeyaan musharrax aan ku meteleynin baarlamaanka? Inkastoo qodobka 12-aad ee sharciga doorashooyinka qaranka uu dhigaayo in baarlamaanka uu go'aamin doono nidaamka doorashada ee xildhibaanada metalaya Soomaaliland, doorasho toos ah oo xildhibaanadan lagusoo doorto waxa ay dhalineysaa su'aalo dheeraad ah ee la xiriirta howlgelinta sharciga doorashooyinka. Caqabad kale oo middan la xiriirta ayaa ah sida loo dooranaayo xildhibaannada kasoo jeeda beelaha deggan goobaha ay gacanta ku hayaan Al-shabaab.

Haweenku waxa ay ka yihiin 24% baarlamaanka hadda jira. Sannadkii 2016, metelaadda haweenka ayaa la kordhiyey kadib markii kuraas loo qoondeeyay oo ay haween keliya ku tartameen (inkastoo hiigsigii 30% aan la gaarin). Sharciga doorashooyinka qaranka ma damaanad qaadayo sida haweenka loogu metelayo baarlamaanka. Soo celinta qoondada kuraasta ay ku tartamayaan haweenka keliya waxaa ay ugu yaraan joogteyn kartaa heerka metelaadda haweenka haatan ee baarlamaanka. Beesha caalamka ayaa ah horeyna u aheyd taageeraha iyo u doodaha ugu weyn ee metelaadda haweenka.

Inkastoo qoondada haweenka ay u baahnaan doonto wadahadal iyo dood, hadana waxaa jirto ka hadal yar oo ku aadan metelaadda dadka barakacayaasha ku ah gudaha dalka (kuwaas oo tiro ahaan ka badan 2 malyan) iyo dadka aan lixaadkoodu dhameystirneyn ee doorashooyinka baarlamaanka.

28-kii Febraayo 2020, labada gudoomiye ee baarlamaanka ayaa magacaabey guddi isku-dhaf ah oo ka kooban 17 xubnood oo loo xilsaaray inay diyaariyaan xeerarka ku saabsan deegaan-doorashada kuraasta, qoondada haweenka, doorashada wakiilada Soomaaliland ee labada aqal ee baarlamaanka iyo wakiilladda gobolka Benaadir. Guddiga waxa la faray in ay arrimahan xal uga gaaraan muddo 45 maalmood ah. In la caddeeyo arrimahaan ayaa muhiim u ah dhaqangelinta sharciga doorashooyinka qaranka. Si kastaba ha ahaatee, weli ma cadda sida guddiga ay xal ugu heli doonaan caqabadahaas adag. Guddiga ayaa hakiyey 2-dii Abriil latashiyadii ay wadeen sababo la xiriira faafidda COVID-19.

Caqabadaha siyaasadeed iyo kuwa amni

Marka lagasoo tago cilladaha sharciga doorashada iyo caqabadaha dhanka farsamada iyo fulinta ah, waxaa jira caqabado siyaasadeed iyo amni kuwaasoo saameyn weyn ku yeelan doona suurtagalnimada doorashooyin xalaal ah oo ka dhaca guud ahaan Soomaaliya.

Midda koowaad, waxaa jira xisbiyo siyaasadeed oo kumeelgaar ah kuwaas oo kaalin muhiim ah ka ciyaari kara doorashooyinka. Nooca doorashada ayaa dhigaya in xisbiyada siyaasaddu ay ku yeeshaan musharraxiin ugu yaraan 50% kuraasta baarlamaanka. Inkastoo kaalintan muhiimka ah ay leeyihiin xisbiyada, haddana qaar kamid ah xisbiyada siyaasadda waxaa ay dareemayaan in aan laga qeyb gelinin oo hoggaanka talada haya aanay kala tashan arrimaha la xiriira doorashada. Qaar kamid ah xisbiyadan waxa ay sameysteen isbaheysiyo, waxa ayna muujiyeen ku qanacsanaan la'aantooda dadaallada ay wadaan hoggaanka dowladda federaalka ee ku aaddan qabashada doorashooyin hufan oo lagu kalsoonaan karo oo ka dhaca Soomaaliya.

Midda labaad, dowlad goboleedyada ayaa ah daneeyayaal muhiim u ah qabashada doorasho ka dhacda Soomaaliya. Khilaafka u dhexeeya dowladda federaalka iyo qaar kamid ah dowlad goboleedyada (gaar ahaan Puntland iyo Jubaland) ayaa ah caqabad siyaasadeed oo saameyn weyn ku yeelan karta doorashooyinka soo socda. Puntland iyo Jubaland waxa ay joojiyeen shaqada Gudiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee deegaannada ay ka arrimiyaan. Haddii uu sii socdo khilaafka u dhexeeya dowladda federaalka iyo labadaan dowlad goboleed, waxaa adkaan doonta in doorashooyin toos ah laguna kalsoonaan karo ku qabsoomaan jadwalkii loo dejiyey.

Midda saddexaad, xaaladda amni ee ka jirta Soomaaliya weli waa mid nugul. Al-shabaab waxaa ay khatar amni ku tahay doorashooyinka. Inkastoo aanay horjoogsan ama weecin hannaankii doorasho ee 2016, haddana waxa ay bartilmaameedsadeen odayaashii dhaqanka iyo xubno kamid ah ergadii dooraashooyinka ee ka qeybgalay doorashadii dadbaneyd. Intaas waxaa sii dheer, gacan ku hayntooda dhuleed iyo amni darada guud ee dalka waxa ay yareyn karaan deegaannada ay doorashooyinka ka dhici karaan, diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha, iyo ka qeybgalka muwaadiniinta ee doorashada.

Wakhtiga la daabacay warbixintan, faafitaanka caabuqa 'Covid-19' ayaa carqalad weyn iyo khasaaro nafeed ku haya dunida oo dhan. Soomaaliya ayaa laga helay dhowr kiis, mana cadda sida uu caabuqaani u saameyn doono waddamada Bariga Afrika bilaha soo socda. Haddii uu si xowli ah u faafo, waxay u badan tahay in ay saameyn ku yeelan doonto qorsheynta iyo u diyaargarowga dooraashooyinka Soomaaliya ee 2020/2021. Arrinkani hadda maahan mid aan meeshan kaga hadleyno, laakiin akhri faallo aan dhowaan ka qornay xaaladda u diyaargarowga Soomaaliya ee caabuqaan. Falanqeyn iyo faallooyin dheeri ah ayaan sameyn doonnaa haddi caabuqa Covi-19 kusii faafo dalka.

SOMALI PUBLIC AGENDA
Mogadishu - Somalia

Turjumidda Af-Soomaaliga waxaa sameeyay

TAYO TRANSLATIONS

Talooyin tixgelin mudan

1. Ansixinta sharciga doorashooyinka waxaa uu ahaa tallaabo loo qaaday jihada saxda ah. Sikastaba ha noqotee, sharci waxaa loogu tala galey in uu sii jiro, sharciga doorashadana wuxuu qaabayn doonaa sida dimuqraadiyaynta Soomaaliya u ekaan doonto sannado badan oo soo socda. Nidaamka 'Horeeyaa Guuleysta' oo sharciyeynaya awood-qeybsiga beelaha ku dhisan ee 4.5 waa in loo adeegsado isbeddelka siyaasadeed ee 2021 oo keliya. Sharci dejiyeyaasha waxa ay isku dhafeen qaab-dhismeedka doorashada wakhtiga dhaw iyo dimoqraadiyeynta Soomaaliya wakhtiga fog. Marka doorashada la qabto oo la dhiso dowlad cusub, sharciga waa in dib loogu noqdaa iyadoo wadatashi ballaaran lala yeelanayo dhammaan daneeyayaasha ay khuseyso. Metelaadda Isku-dheellitiran ee Liiska Xiran iyo hababka kale ee loo arko inay ku habboon yihiin laguna dabaqi karo Soomaaliya ayaa laga fekeri karaa mustaqbalka.

2. Gobolka Benaadir metalaad kuma lahan Aqalka Sare. Wakhtiga dhaw inta maqaamka Muqdisho lagu qeexayo dastuurka federaalka, Benaadir waxaa kuraas loogu qoondeyn karaa Aqalka Sare. 54-ta xubnood waxaa lagu dari karaa 9 kursi oo dheeri ah (taasoo ka dhigeysa tirada guud 63). Maaddaama Muqdishu ay tahay magaalo ay dad badan oo kala duwan ku nool yihiin, 9-ka xubnood waxaa lagu saleyn karaa nidaamka 4.5. Qof kasta oo si joogto ah ugu noolaa Muqdisho 10-kii sano ee lasoo dhaafay ayaa xaq u yeelanaya inuu Banaadir ku metelo Aqalka Sare. Guddiga isku-dhafka ah ayaa soo jeedin kara xalka noocan ah, labada gole ee baarlamaankana waa ay ka fekeri karaan, go'aanna ka qaadan karaan kahor dhammaadka muddo xilkooda iyo inta aanay billaaban doorashooyinka.

3. Qodobka 53-aad waxaa uu baarlamaanku siinayaa awood ay ku kordhistaan xilkooda hadii Gudiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka ay shaaciyaaan in doorashada aan lagu qaban karin wakhtigeeda. Baarlamaanku waa in ay ka fekeraan muddo kororsi farsamo oo ka yar hal sano intii ay ka fekeri lahaayeen muddo kororsi sanado badan ah. Tan dambe waxaa ay abuuri kartaa qalalaase siyaasadeed, waxa ayna carqaladeyn kartaa dadaallada loogu jiro dhismaha dowladnimada curdanka ah ee Soomaaliya.

4. Maaddaama ay tahay xaalad taxadar u baahan, muddo kordhin kasta waa in loola dhaqmo si taxaddar leh oo aanan laga fekerin dan-siyaasadeed gaaban. Dowladda talada haysa waa inaysan keligeed go'aansan kordhinta muddada xil-heyntooda wax ka baxsan muddadii loo igmaday iyagoo daliishanaya qodobka 53-aad ee sharciga doorashooyinka. Taa beddelkeedana waa inay raadiyaan muwaafaqo laga helo dhammaan dhinacyada siyaaasadda si loo go'aamiyo duruufaha lagama maarmaanka u ah muddo kordhinta, la isla meel dhigo muddada wakhti kordhinta iyo hannaan doorasho oo si gaar ah loogu qorsheeyay xaaladdan xasaasiga ah. Mudnaanta wa inay siiyaan inay ka fogaadaan in dalku lugaha lagalo qalaase doorasho.

5. Haweenka qiyaastii waa kala bar bulshada soomaaliyeed. Xaqiijinta metalaaddooda ee baarlamaanka soo socda waa inay noqotaa dadaal wadajir ah. Siyaasiyiintu waa in ay dhiirrigeliyaan oo ay cod u noqdaan metelaadda haweenka ee baarlamaanka soo socda. Khibraddii 2016-ka ayaa muujineysa in kuraasta ay u tartamaan haweenka keliya ay kordhi karto ama ugu yaraan joogteyn karto heerka metalaadda haweenka ee doorashooyinka soo socda.

6. Dooorashooyin xalaal ah ayaanan suuragal aheyn iyadoo khilaaf joogto ah uu ka dhex taagan yahay dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada. Labada heer ee dowladeed waa in ay noqdan kuwo diyaar u ah heshiis, siyaasiyiinta soomaaliyeed iyo diblomaasiyiinta waa in ay gacan ka geystaan sidii miiska wadahadalka loo keeni lahaa siyaasiyiinta labada dhinac. Wadashaqeyn wanaagsan oo amniga doorashada iyo qoondeynta deegaan doorashada kuraasta baarlamaanka ayaan suuragal noqon karin iyadoo aanu jirin xiriir wadashaqeyn oo u dhexeeya dowladda federaalka iyo dhammaan dowlad goboleedyada.

Tixraac

Isak, F. & Wasuge, M., 2019. Getting the party started: re-instituting political parties in Somalia. *Somali Public Agenda,* Issue 5, pp. 1-4.

The Federal Republic of Somalia, 2012. *Provisional Constitution*. [Online] Available at: http://hrlibrary.umn.edu/research/Somalia-Constitution2012.pdf [Accessed April 2019].

Wasuge, M. & Isak, F., 2020. Review of the Proposed First Past The Post Electoral Model for Somalia. *Somali Public Agenda*.

Wasuge, M. & Moman, P., 2019. Review of Somalia's draft national election bill. *Somali Public Agenda,* Issue 4, pp. 1-4.

Tixanaha Doorashada: *doorashooyin baarlamaan iyo madaxweyne ayaa la filayaa in ay Soomaliya ka dhacaan dhammaadka 2020 iyo bilowga 2021. Waxa aan bilownay qormooyin tixane ah oo la xiriira doorashooyinka. Qormo kasta waxa ay falanqeyneysaa mowduuc la xiriira doorashada. Faalladan waa middii saddexaad ee tixanaha. Somali Public Agenda waxa ay soo dhaweyneysaa talooyinka iyo fikradaha la xiriira doorashooyinka la filayo in ay ka dhacaan Soomaaliya.*